



Su'aalaha Badanaa la Isweydiyo ee ku Saabsan Diiwaan-gelinta Dugsiga Barbaarinta

S: Ilmahaygu waxa uu bilaabi doonaa barbaarinta dayrta? Sidee baan ugu diiwaan-geliyaa dugsiga?

Diiwaan-gelinta onlaynka ahi waa qaabka ugu fudud ee la isku diiwaan-geliyo imika. Waxa aad tagtaa: <https://www.pps.net/Page/14787>. nidaamkani waxa uu qaataa 20-30 daqiiqo shaqaalaha dugsiguna waxa ay kula socon doonaan mudo ka dib oo xagaaga ah si loo xaqiijiyo da'da ilmahaaga, cinwaankaaga iyo tallaalada. Su'aalaha ku saabsan diiwaan-gelinta? Kala xidhiidh xarunta Diiwaan-gelinta iyo Beddelka enrollment-office@pps.net.

S: Miyuu arday kasta oo barbaarinta ahi u baahan yahay diiwaan-gelin cusub?

Uma baahnid in aad abuurto diiwaan-gelin cusub haddii ilmahaagu xaadiro PPS Head Start ama barnaamijka barbaarinta ka hor ama uu leeyahay IEP. Dhamaan ardayda kale oo dhan waxa ay u baahan yihiin in ay dhamaystiraan nidaamka diiwaan-gelinta sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah.

S. Ilmahaygu waxa uu ku helay beddel la ansixiyey nidaamka bakhtiyaa-nasiibka ah. Ma ku diiwaan-gelin karnaa onlayn?

Haa, fadlan ku diiwaan-geliya onlayn, laakiin waxa aad u baahan doontaan in aad ku bilawdaan nidaamka diiwaan-gelinta dugsiga jaarkiina, ee aydaan ku bilaabin dugsiga beddelkiina. Isla marka diiwaan-gelinta onlaynku dhamaato, macluumaadka ilmahaaga waxa loo wareejiin doonaa dugsiga beddelka ee la ansixiyey.

S. Waxa aan doorbidi lahaa in aan diiwaan-geliyo ilmahaaga aniga oo adeegsanaya foom waraaq ah. Taasi suuragal ma tahay?

Haa! Xidhmooyin diiwaan-gelin oo ku jira gal-waraaqeedyo shaambadaysan oo ah kuwa qofka diraya cinwaankiisa lagu qoro ayaa aanu ku haynaa goobaha hoose.

Goobta Qaybinta Cuntada	Cinwaanka	Maalinta/Wakhtiga ay Furan Tahay	Luuqadaha shaqaalaha goobta
Franklin	5405 SE Woodward St.	Jimcayaasha 11:30 - 1:30	Isbaanish, Raashiyaan, Yukrayniyaan, Ingiriisi
Lent	5105 SE 97th Ave.	Isniinaha 11:30 - 1:30	Isbaanish, Fiitnaamiis, Ingiriisi, Kantooniis
Markham	10531 SW Capitol Hwy	Arb 11-1	Somali, Carabi, Isbaanish

Martin Luther King, Jr.	4906 NE 6th Ave.	Khamiista 11-1	Ingiriisi, Isbaanish
Rosa Parks	8960 N Woolsey Ave.	Isn/Khami duhur -2	Ingiriisi, Isbaanish
Scott	6700 NE Prescott St.	Salaasooyinka 11 – 1	Ingiriisi, Isbaanish
Sitton	9930 N Smith St.	Isniinaha 11-1	Ingiriisi, Isbaanish
Woodmere	7900 SE Duke St.	Arb 11-1	Ingiriisi, Isbaanish

S. Ma waxa ay tahay in aan sugo dugsiyadu in ay dib u furmaan si aan u dhamaystiro nidaamka diiwaan-gelinta?

Maya, waxa aad kala shaqayn kartaa shaqaalaha ku sugan Xarunta Beddelka iyo Diiwaan-gelinta dhamaystirka diiwaan-gelinta warqadeed ama onlayn. Kala xidhiidh Email ka enrollment-office@pps.net ama ka wac 503-916-3205.

S. Ilmahaygu waxa uu xadiray Albina Head Start. Ma u baahanahay in aanu diiwaan-gelino?

Haa, fadlan ku diiwaan-geli onlayn ahaan ama haddii aad doorbidayso, waxa aad qaadan kartaa xidhmo waraaq ah oo aad ku diri kartaa boosta adiga oo adeegsanaya gal-waraaqeedka shaambadaysan, ee qofka diraya cinwaankiisa lagu qoro ee yaalla mid ka mid ah goobaha ku liistaysan jadwalka hoose.

S. Ilmahayga waxa lagu dari doonaa fasal waxbarasho oo gaar ah Dayrta, laakiin dugsigii weli lama go'aansan. Ma tahay in aan imika diiwaan-geliyo?

Maya, waaxda Waxbarashada Gaarka ah ayaa kuu maamuli doonta nidaamkaas iyada oo kuu sheegi doonta goobta dugsigiisa sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah. Haddii aad hayso su'aal, la xidhiidh isu-duwaha beddelkaaga.

S. Waxa aan ka werwersanahay bilawga dugsigiisa. Sidee baa aan ku ogaanayaa in ilmahaygu diyaar yahay?

Haddii ilmahaagu yahay 5 marka la gaaro 1 da Sibtambar, 2020, markaa ilmahaagu waa u diyaar barbaarinta! Si aad u barato wax badan oo ku saabsan tallaabooyinka la qaadayo ka hor bilawga dugsigiisa, booqo bogga websaydka Bartaha Hore: <https://www.pps.net/Domain/183>. Waxa aad daawan kartaa muuqaal ku saabsan bilaabidda barbaarinta iyo Qorshaha Ahmiyad-siinta Imaha oo dhamaystiran kaas oo aad mudo dambe la wadaagi karto macallinka ilmahaaga. Sidoo kale, booqo bogga websaydka dugsigiisa: pps.net, dugsiyada, kadibna geli magaca dugsigiisa. Haddii aad hayso su'aal guud oo ku saabsan barbaarinta, la xidhiidh dugsigiisa. Haddii aanad hubin cida ay tahay in aad la hadasho, la xidhiidh email ka nhauth@pps.net ama eglasgow@pps.net.

S: Goorma/sidee ayaa aanu ku ogaan doonaa wax badan oo ku saabsan sida dugsigiisa u eekaan doono dayrta?

Dugsiyadu waxa uu baahin doonaa macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan bilawga dugsigiisa horraanta Ogosto. Ama waxa aad u booqan kartaa websaydka Barnaamijyada Bartaha Hore macluumaadkii u dambeeyey. Kooxaha degmadu waxa ay shaqayn doonaan xagaaga oo dhan si ay u horumariyaan qorshayaasha dib u furitaanka ee dugsiyada buuxiya tilmaamaha badbaadada

iyo caafimaadka ee degmada iyo gobolka.

S. Waxa aan shaqeeyaa illaa 5gd maalin walba waxana aan u baahanahay in aan u diiwaan-geliyo ilmahayga daryeelka dugsiga ka dib.

Daryeelka ilmuhu ma ahaan doonaa mid shaqaynaya Dayrta?

Haa – daryeelka ilmuhu waxa uu ahaanayaa mid shaqaynaya Dayrta, inkasta oo aanu ka shaqaynayno faahfaahinta. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyaha daryeelka ilmaha ee dugsigaaga, fadlan waxa aad tagtaa: <https://www.pps.net/Domain/184>. Waxa aad u baahan doontaa in aad si toos ah u diiwaan-geliso adiga oo kaashanaya bixiyaha.